

Shaqooyinka Kale oo Maktabaddau qabato ama ay maktabaddu u qabato dadweynaha.

- Maktabaddo badan ayaa ayaa ku deeqa waqtiyo ay dadka waaweyne waddawadahadlaan si ay u bartaan akhriska ama Ingiriisga, warbixin intaa ka baddan waxaad ka heli kartaa adiga oo waca lumbarkan: 425.369.3454 ama gala shabekadda internetka oo ah www.kcls.org/lit/esl.html. Intaa hadii aan Af Somaali ku sheego waxa weeye: shabekadda internetka www.kcls.org/lit/esl/html
- Waalidka iyo dadka ka shaqeeya xanaanadda caruurta waxay jeeg-garayn karaan sanaadiqda khaaska ah ee lagu xereeyo buugaagta carruurta, sida: dayuuradaha, treennada, xayawaanka IWM. Waxaadnaad wacdaa lumbarkan 425.369.3323 ama lumbarka furan ee ah 1.877.905.2009 faraca 3323 ama gal shabekadda internetka webpage-ka: www.kcls.org.webkids/btgo.
- Sheybaadka Kombytarada ee wareega wuxuu ka bixiyaa casharo xarumaha komunitiyada, guryaha dadka howlgabka ah iyo iskuulada.

Mas uuliyada caruurta (ka yar 18ka sano)

Waalididka ama dadka mas'uulka ka ah caruurta, waxay mas'uul ka yihiin isticmaalka caruurta ay isticmaalayaan maktabadda, qaadashadda alaabta iyo nabadgelyadda caruurta inta ay maktabadda joogaan ama ay ku jiraan.

Furitaanka maktabaddaha

Badanaa maktabadduhu ama maktabadda mujtamucu waxa ay furanyihiin todobadda (7) cishu ee weega, liistada maktabaddaha waxa aad ka helayaa shebakedda internetka oo ah www.kcls.org.



The King County Library System



Algona-Pacific Library 253.833.3554
Auburn Library 253.931.3018
Bellevue Regional Library 425.450.1765
Black Diamond Library 360.886.1105
Bothell Regional Library 425.486.7811
Boulevard Park Library 206.242.8662
Burien Library 206.243.3490
Carnation Library 425.333.4398, TTY 425.333.4398
Covington Library 253.630.8761
Des Moines Library 206.824.6066
Duvall Library 425.788.1173
Fairwood Library 425.226.0522
Fall City Library 425.222.5951
Federal Way Regional Library 253.838.3668
Federal Way 320th Library 253.839.0257
Foster Library 206.242.1640
Issaquah Library 425.392.5430
Kenmore Library 425.486.8747
Kent Regional Library 253.859.3330, TTY 253.854.1050
Kingsgate Library 425.821.7686
Kirkland Library 425.822.2459
Lake Forest Park Library 206.362.8860
Lake Hills Library 425.747.3350
Library Connection @ Crossroads 425.644.6203
Maple Valley Library 425.432.4620
Mercer Island Library 206.236.3537
Muckleshoot Library 253.931.6779
Newport Way Library 425.747.2390
North Bend Library 425.888.0554
Redmond Regional Library 425.885.1861
TTY 425.895.7951
Richmond Beach Library 206.546.3522
Sammamish Library 425.836.8793
Shoreline Library 206.362.7550
Skykomish Library 360.677.2660
Skyway Library 206.772.5541
Snoqualmie Library 425.888.1223
Tukwila Library 206.244.5140
Valley View Library 206.242.6044
Vashon Library 206.463.2069
White Center Library 206.243.0233
Woodinville Library 425.788.0733
Woodmont Library 253.839.0121
Foundation 425.369.3448
Traveling Library Center 425.369.3456
The Answer Line 425.462.9600
(outside calling area 1.800.462.9600)
TTY 206.684.4494

TTY numbers are for the deaf and hard of hearing.

Welcome to Your Library
Somali 6/2003



www.kcls.org



Soo dhawoow!.....

Maktabaddaada dadweynuhu waa meel shaaca wax loo qaado. Haddii aad haysato kaarka Habka Maktabadda Deegaanka Boqorka oo layidhaahdo (King County Library System card) waxaad si aad ah ula dhici doontaa ama ula tacajabi doontaa waxyaabaha aad la kulmi doontid.

Maxaan ka heli doonaa Maktabadda?

Maktabadda waxaad ka heli doontaa waxyaalahan soo socda:

- Kombiyuutaro waxbarasho, qoritaan, iyo isticmaalka shebakadda internetka.
- Buugaag, majallado, muusiko ku duuban saxanada fidsan iyo cajaladoba, buugaag cajallado ku duuban iyo weliba kuwa filin la daawado leh. Kuwaasoo badan kooda lagu heli karo luqado aanan Ingiriis ahayn.
- Fasalo lagugu barayo xirfadaha kala duwan ee kombuyuutada.
- Waqtiyada sheekada oo loogu talagalay carruurta iyo qoysaska.
- Barnaamijyo bilaash ah oo loogu talagalay carruurta, dhallinyarada iyo dadka waaweyn: munaaqishooyin koox koox ah oo ku saabsan buugaagta (book discussion groups), qorayaasha buugaagta ee martida ah, hawl qabadka masraxadaha, carruurta iyo waxyaabo kale.
- Wargeysyo, qaamuusyo tixraac iyo dhacdooyin kombiyuutada ku salaysan, oo kuna habaysan looguna talagalay in aad adigu isticmaasho.
- Qolalka kullanaada dhacdooyinka dadweynaha lagu qabto; foomamka diiwaangelinta codbixiyaha ama codbixinta iyo foomamka canshuurta.
- Meel aad wax ku barato, ku akhrisato ama aad shaqada guriga loo yaqaanno hoomweerigaaga (homework) ku qabsato.

Sideen ku heli karaa waxa aan uga baahanahy Maktabadda?

Imow maktabadda, ka dibna buuxi foomka diiwaangelinta kooban loogu talagalay. Waxaa lagaaga baahan yahay inaad la timaadiid wax caddayn ah oo sawirkaaga iyo cinwaankaaga ku dheggen yihay. Waxaad kaloo iska diiwaan gelin kartaa kaarka khadka internetka ama looyaqaan shabekadda internetka. Kaarkaaga cusub waxaa boosta laguugu soo diri doonaa muddo 14

maalmood gudahood ah. Kaarkani wuxuu oggolaanayaa inaad isticmaasho wararka urursan ee khadka maktabaddaha adigoo gurigaaga jooga, laakiin si aad waxyaabaha u isticmaasho waxaa lagaa rabaa inaad aqoonsi sawir leh keento maktabadda deegaanka.

Wax qiime ah miyuu ku kacayaa in la helo kaarka maktabaddu?

Jawaabtu waa maya. Canshuurtaada ayaa taageerta Habka Maktabadda Deegaanku King Kowntigu u sheqeeyo Maktabadda oo lyidhaado (King County Library System), sidaa awgeed qof kastaa wuu isitcmaali karaa.

Maxaa dhacaaya haddii uu kaarku iga lumo?

Noo soo sheeg wakhtiga ugu soo horeeya ee suurogal ah. Shaqaalahayaga ayaa kaadhka joojin doonaa si aan loo isticmaalin. Ka dibna waxa kuu banaan inaad kaadh cusub codsatid.

Sideen ku helaayaa waxa aan u baahanahay?

Kombuyuutarka tusmadiisa Waxaa lagu taxay buugaag, fiidiyow, muusiko iyo majallado laga soo ururiyey 42 maktabadood. Haddii aad caawinaad u baahato, fadlan weydiiso. Waxaan ku bari doonaa sida loo isticmaalo. Haddii shayga aad rabto hortaa la qaatay waxaad isticmaali kartaa inaad tidhaahdo 'ii sii dhig' (on hold.) Waxad dooran kartaa maktabadda aad rabto in lagugu soo diro. Marka la soo celiyo shaygii aad rabtay waxaa lagu soo dirayaa boost-kaadh (ama shabekadda e-mailka looyaqaanno hadba tii aad adigu doobido) si aad u soo qaadata. Wax qiimo ah la isaga qaadi maayo in buugaag la codsado.

Ilaa intee ayaan haysan karaa shayga aan soo qaatay?

Buugaagta, suxuunta wax lagu duubo, ee (CDs) iyo cajalladaha maqalka, Jawaabtu Waxa weeye:

- Waxaad haysan kartaa 28 beri laga yaabe in aad cusbooneysiin karto 14 kale. Fiidiyowga, saxamada elektoroniga ee (DVDga looyaqaanno) iyo majalladdaha.
- Laga yaabe in aad cusbooneyisiin karto 7 beri oo kale.

Marka aad shay qaadata waxaa lagu siinaya warqad qoraal ah oo ay ku cad yihiin inta shay ee aad qaadatay. Waqtiga aad ku soo celinayso amaahda aad qaadatay waxay ku caddahay warqada lagu siiyayee resiitka looyaqaanno (receipt).

Maxaa dhacaaya haddii aan soo celinta la soo daaho?

Maktabadaha intooda badan waxaa kugu soconaya ganaax ah 10centi maalintiiba shay kasta. Haddii aad la soo daahdo fiidiyowga iyo saxamada elektrooniga ah waxaa kugu soconaya 1 doolar maalintiiba shay kasta. Ganaaxa waxaa la joojinayaa marka aad alaabta soo celiso ama marka xadka ganaaxu gooro halkii ugu danbeysay. Ganaaxyada intooda badani waxay ku istaagaan 3 doolar oo ah fiidiyowga iyo saxanada elektroniga ee looyaqaanno DVDda oo ah 5 doolar. Meel kasta oo ay maktabadda dadweynaha ee KCLS ayaad ku taal ayaad ku celin kartaa shaygi aad amaahatay.

Maxaa dhacaaya haddii ganaax la igu leeyahay?

Ma sii isticmaali kartid kaarkaga maktabadda haddii uu gannaaxada gaaro ama u gaadho ilaa 10 doolar ama ka badan. Haddii laguugu yeesho ganaax ka badan 25 doolar, waxaad warqado iyo teleefoon ka helaysaa qaybta lacag uruurinta ee layidhaado (collection agency) oo kaa codsanaysa soo celinta amaahdi aad qaadatay ama aad ka qaabtay maktabadda iyo in aad ganaaxana bixiso. Waxaa muhiim in aad celiso shayga lagunna soo celiyo maktabadda waqti munaasab ah si dadweynaha kale ee u baahan ay u amaahda ama ay u isticmaalaan.

Ma heli karaa caawinaadda maktabaddaha anigoo iimaan dhismaha maktabaddu ku taal?

Maktabadaha qaarkood awaxay leeyihiin adeegyo lagu heli karo telefoonoo iyo xitaa khadka furan! Waxaad samayn kartaa sidatan:

- Wac maktabaddaada dadweynaha.
- Wac khadka telefoonka jawaaba kaas oo ah: 425.462.9600 ama 1.800.462.9600.
- Weydii Shaqaale Laybareeri (adiga oo isticmaalaya iimayl ama wada-hadalka internetka) marka aad ku jirtid rugta internetka ee KCLS (www.kcls.org).